

# Xaggeen Ka Eegi Karaa Natiijooyinkayga Ka-tijaabadada?

Haddii lagaaga tijaabiyay cudurka dakhtarkaaga daryeelka asaasiga ah iyo/ama rugtaada caafimaadka, isticmaal kadinka barta internetka ee “MyChart” si aad u hesho natiijooyinka ka-tijaabinta.

Haddii lagaaga tijaabiyay cudurka goob xarun caafimaad kale oo aan ku xirnayn dhakhtarkaaga daryeelka asaasiga ah, fadlan si toos ah ula xiriir rugta caafimaadka.

**Fadlan xusuusnow:** Waxay qaadataa qiyaastii 2 ilaa 4 maalmood laga soo bilaabo taariikhda namuunadda la qaaday in la tijaabiyo illaa natiijada ka-tijaabintu diyaar u noqanayso in loo siidaayo bixiyaha daryeelka caafimaadka.

Waktiga dhammaystirka ayaa lagu qeexaa celcelis ahaan tirada maalmaha ee laga soo bilaabo taariikhda qaadidda namuunadda illaa natiijada baaritaanka la diyaariyo. Xaaladaha qaarkood, wakhti dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo in la gaado ka-tijaabinno dheeraad ah.